

federaal ama ka sii hoos haystae qandraas yahay si aad u xerayso cabasho.

## 18. Sideen ayaan ugu xereeyaa cabasho OFCCP?

Waxaad ku xareyn kartaa cabashada takoorka ku salaysan adigoo:

- Buuxiya oo gudbiya foom onlayn ah oo loo maro barta internetka OFCCP; ama
- Buuxiya foom adiga oo qof ahaan yimaad xafiis OFCCP; ama
- Ugu soo dir boostada, iimayl, ama faaks foomkaad buuxisay xafiiska degmeedka OFCCP ee ku lug leh goobta aad ka sheeganayso eedda takoorku inay ka dhacaday.

Foomka waxaa laga heli karaa barta internetka ee <https://www.dol.gov/ofccp/regs/compliance/pdf/pdfstart.htm> iyo iyada oo ah qaab warqad ah dhammaan xafiisyada OFCCP. Si aad u hesho xafiiska ugu dhow meesha aad ku nooshahay, booqo liiska onlaynka ah ee xafiisyada OFCCP ee ku yaal: [www.dol.gov/ofccp/contacts/ofnation2.htm](http://www.dol.gov/ofccp/contacts/ofnation2.htm).

Waa inaad xusuusnaato inaad saxiixdo foomka cabashada ee aad buuxisay. Haddii aad ka gaabiso yeelidda sidaas, OFCCP ayaa weli kaa aqbali doonta cabashadaada laakiin arrimo baare OFCCP ayaa ku weyddiisan doonaa inaad saxiixdo foomka marka la joogo ballanta waraysiga ee xigta. Cabashooyinka leh eedaynta naafanimada ku salaysan takoorka waa in lagu xereeyaa 300 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda eedaynta takoorka, haddii waqtiga ku xeraynta loo dheeray sabab macquul ah mooye.

## 19. Miyuu loo-shaqeeyahygu iga eryi karaa, ama xilkayga shaqada xoos u dhigi karaa ama iila dhaqmi karaa si ka xun sidii hore maadama aan xereweyay cabasho?

Maya. Waa sharci-darro inuu loo-shaqeeyahaagu kaaga aargoosto xereyantaada cabashada ama ka qaybqaadahaada arrimo baaritaan. Xeerarka OFCCP ayaa kaa difaacaya adiga xasaradaynta, cabsigelinta, hanjabaadda, wax ku dirqiga, ama kaga aargoosiga ku dhaqanka xuquuqdaada.

## 20. Ma u soo gudbin karaa cabasho OFCCP iyo Guddiga U Sinnaanta Fursadaha Shaqada / Equal Employment Opportunity Commission (EEOC)?

Haa, haddii aad ku xerayso labadaba OFCCP iyo EEOC, cabashada yaay baari doontaa hay'adda ku habbooni. Mararka qaarkood, OFCCP iyo EEOC ayaa go'ansam kara inay wada shaqeyaan si ay u soo baaraan cabashadaada.

OFCCP ayaa guud ahaan haysa cabashooyinka la xereeyay ee ka horjeeda qandaraaslayaasha federaalka kana cabanaya kala takooridda ku salaysan naafanimada. OFCCP ayaa guud ahaan haysa cabashooyinka la xereeyay ee ka horjeeda qandaraaslayaasha federaalka markay arrimo u muuqdaan inay jiraan kala takoor saameeya koox shaqaalaha ama codsabayaasha ka tirsan, iyo kuwa kuwa ku eedanaya takoorid ku salaysan u jeedka arrimaha isku-tagga, isku aqoonsiga jinsiga, ama xaaladda heerka ciidanka kuwa ka tirsanaa. OFCCP ayaa guud ahaan, haysa cabashooyinka la xereeyay ee ka horjeeda qandaraaslayaasha federaalka ee sheeganaya kala takoor ku salaysan markuu qof weyddiinayo, ka hadlayo ama shaaca ka qaadayo arrimaha ku saabsan lacag bixinta shaqada.

## 21. Maxaa dhici doona haddii ay jirto helitaan inaan ahaa dhibbane ka takoor shaqo?

Waxa laga yaabaa inaad u mudnaato xallin kugu meelaya booskii ay hayd inaad qabato haddii aanu kala takoor ku dhici lahayn. Waxa laga yaabaa inaad u mudnaato in lagu shaqaaleeyo, lagu dallacsiiyo, shaqada dib laguugu soo celiyo, ama lagu siiyo u waafajin macquul ah, oo ay ku jirto shaqo meel kale u hagaajin. Waxa kale oo laga yaabaa inaad u mudnaato helitaan lacag bixinta kuugu maqan shaqada, lacag horay lagaa siiyo, lacag u kordhin, ama arrimo qaarkood oo iskugu jira xallimaas. Waxa intaa u dheer, haddii OFCCP ay ogaato inuu qandaraaslaha federaalka ama kuwa ka hoos shaqeyaa ay ku xadgudbeen xeerka Qaybta 503, OFCCP ayaa ku kici doonta sidii shirkadda looga hor istaagi lahaa ama looga tirtiri lahaa u tixgalinta qandaraasyada federaalka ee mustaqbalka ama in shirkadda laga noqdo heshiyyadeeda qandaraasyada iyo wax la hal maala ee haatan jira.

### Wixii macluumaad dheeraad ah:

THE U.S. DEPARTMENT OF LABOR  
**Office of Federal Contract Compliance Programs**  
200 Constitution Avenue, NW  
Washington, D.C. 20210  
1-800-397-6251  
TTY: 1-877-889-5627  
[www.dol.gov/ofccp](http://www.dol.gov/ofccp)

Fadlan la soco inay xaashidan xaqiiqdu bixinayso macluumaad guud. Looguma talagalin inuu baddalo meesheedii sharciyada iyo qawaaniinta dhabta ah ee ku saabsan barnaamijka halkan lagu soo qaaday.

## XUQUUQDAADA OGOW

# Xuquuqda Naafanimada

## OFCCP Ayaa Ka Difaacda Shaqsiyaadka Naafada ah Kala Takoorka

### 1. Waa maxay kala takoorka shaqo ee ku salaysan naafanimada qofka?

Kala takoorka shaqo ee ku salaysan naafanimada qofka ayaa guud ahaan dhacda markuu loo-shaqeeyuhu uu ula dhaqmo shaqo codsade u qalma shaqda ama shaqaale si kala eexasho ah dhinac kasta oo ah shaqada sababta oo shaqsiga oo leh ama lahaa naafanimada, ama loo arko inuu qofkaasi leeyahay naafanimada. Kala takoorka shaqo ee ku salaysan naafanimada qofka ayaa guud ahaan dhacda marka siyaasaha iyo habraacyada loo-shaqeeyuhu si iska cad ay saamayn aan loogu talagalin ay ugu yeeshaan shaqsiyaadka qaba naafanimada.

### 2. Waa maxay xuquudaydu?

Adiga laguugma diidi karo shaqo, oo laguguma samayn doono xasaradayn, xil hoos uga dhig, shaqo ka eryid, lacag bixin ka yarayn, ama lagu la dhaqmi si xun sababta oo ah adiga oo qaba naafanimada, ama waxay leeyihiin taariikh ah oo naafo ah, ama sababta oo ah loo-shaqeeyahaaga oo kuu arka inaad leedahay dhantaalan dhimirka ama jirka ah oo joogto ah.

Haddii aad tahay qof shaqaale ah oo naafanimada leh waxaad weyddiisan kartaa, oo waa inuu loo-shaqeeyuhu waa inuu bixiyaa, "u waafajin macquul ah" si aad u gudato shaqadaada. Kuu waafajin macquul ah waa inuu adiga ku siiyaa loo-shaqeeyahaagu haddii ay markuu sidaas sameeyo ay u horseedi doonto loo-shaqeeyaha dibaato ama kharash aad u badan mooye.

Sidoo kale, haddii aad tahay shaqo codsade qaba naafanimada, loo-shaqeeyuhu waa inuu bixiyaa u waafajin macquul ah inta lagu guda jiro nidaamka codsiga si ay kuugu saamaxdo inaad shaqada codsato oo lagu tixgeliyo shaqada. Mar kale, u waafajinta macquul ah waa in lagu siiyaa haddii ay noqonayo mid aad u adag ama aad u qaali ah in sidaas la sameeyo mooye.

### 3. Miyay OFCCP dhaqangelisaa sharciyada ka sohorjeeda kal-takoorka ku salaysan naafanimada?

Haa. OFCCP ayaa dhaqangelisa Qaybta 503 ee Xeerka Dib u Meelaynta. Sharcigan ayaa sharci-darro ka dhigaya inay

loo-shaqeeyayaasha ay hawlo wada galaan Dowladda Federaalka ah inay ku kala takooro codsabayaasha shaqada iyo shaqaalaha iyada oo ku salaysan naafanimada. Taas macnaheedu waa in loo shaqeeyayaashani aanay adiga ku takoori karin markay go'aaminayaan go'aammada shaqaalaynta, shaqo ka eryidda, lacag bixinta, dheefaha, hawl u dirka, dallacinta, shaqo muddo gaaban ka fariisinta, tababbaritaanka, iyo hawlaha kale ee la xiriira shaqada.

### 4. Ayay OFCCP difaacdaa?

OFCCP ayaa difaacda xuquuqda codsabayaasha shaqada iyo shaqaalaha ee Qandaraaslayaasha Dowladda Federaalka iyo kuwa ka hoos shaqeeeya. Kuwaas waxa ka mid ah shaqaalaha bangiyada, shirkadaha teknoolojiyadda macluumaadka, warshadaha hilibka, dukaamada tafaariiqda, warshadaha wax soo saarka, shirkadaha xisaabaadka, iyo shirkadaha dhismaha, iyo kuwo intaa u dheer.

## Qeexidda Naafanimada

### 5. Waa maxay qeexidda "naafanimadu"?

Waxa lagu qaadanaa inaad tahay shaqsi naafanimada qaba haddii aad leedahay:

- dhantaalan dhimirka ah ama jirka ah oo si aad ah u xaddida mid ama in ka badan waxqabadyadaada ugu waaweyn ee nolashaada; ama
- taariikh diiwaan ee dhantaalankaas oo kale ah

Waxa kale oo dhici karta in lagu qaddariyo shaqsi naafanimada leh ah haddii "qaato" inaad leedahay dhantaalan dhimireed ama jireed oo xaddidaysa waxqabadyadaada ugu waaweyn ee nolashaada, ama lagu "qaato" inaad leedahay diiwaan ama taariikh dhantaalanka sidaas oo kale ah xitaa haddii aadan lahayn wax u dhinnaan.



## 6. Maxaa ka mid ah tusaalooyinka qaarkood ee ah naafanimada?

Dhantaalanka jirka ee hoosta ku qoran ayaa sida caadiga ah loo arkaa inay yihiin naafanimo:

Sonkorowga	Kansarka
Suuxdinta (Qalalka)	Infekshanka HIV
Indho-beelka	

Dhantaalanka badiyaa loo tixgaliyo inay yihiin naafanimo waxa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn, wax u dhinnaanta ay ka midka yihiin:

Fowdooyinka laxaadka leh ee diiqad (buufis) lahaanta Fawdada niyad marna hoos u dhac iyo kor kac leh Iskiitsofiriiniya (Cudur Maskax ) Dhibaatada Isku-buuqa ee ka Dambeeya Dagaal Ka Qaybgal Fawdada kaga dhagga naf-ku-dirqiga ah ee waxqabadyo gaar ah

## 7. Maxay ka dhigan tahay “si aad ah u xaddidaysa” ?

“Si aad ah u xaddidaysa” micnaheedu waa inay ilaa heer badan ay dhantaalankaaga xaddidayso kartidaada inaad qabato hawlaha waxqabad muhiim u ah nolosha marka loo barbardhigo dadka inta ugu badan. Dhantaalankaagu ma aha inuu iska kaa hortaago, ama si wayn ama si daran u kaaga xaddido qabashada hawlaha nolosha si islamarkaana laguugu tixgeliyo mid “si aad ah u xaddidaysa.”

Tusaale ahaan, haddii aad seexato kaliya laba saacadood habeenkii sababna u tahay fowdada niyad marna hoos u dhaca iyo kor u kaca leh (bipolar) isla markuu qofka caadiga ahi seexdo siddeed saacadood habeenkii waxa aad uga xaddidan tahay seexashada. Saamaynada dhinac ka raaca dawooyinka ahaya laga yaabaa in la tixigaliyo marka la go'aaminayo waxa qofka sida 'aadka ah u xaddidaya.” Sharciga hoostiisa, wax kasta oo dhantaalan ahba looma tixgalinayo naafanimo.

## 8. Waa maxay a “waxqabadka nolosha ugu waawayni”?

Kuwani waa liis ka mid ah waxqabadyada nolosha ee waawayn:

Aragga	Cunidda
Socodka	Qaaditaanka
Hadalka	Waxbarashada
U Fiirsiga	La Xiriirka
Isku-daryeelka	Seexashada
Istaagitaanka	Foorarsiga
Neefsashada	Akhrisashada
Fikiritaanka	Fulinta hawlaha Gacanta La Qabto

Intaa waxa u dheer, waxqabayada ugu waaweyn ee nolosha waxa ka mid ah howlgallada waxqabayada jirka waawayn, oo ay ku jiraan hawlgalada ay ka mid yihiin:

Hab Difaaca Jirka Xubnaha Dareenka gaarka leh iyo Maqaarka Koriaanka Caadiga ee Unugga Nidaamka Dheef Shiidka

Nidaamka Kaadida Mindhicirka Kaadi-haysta Nidaamka Dareemayaasha Maskaxda Nidaamka Neefsiga Nidaamka Dhiig-wareegga Nidaamka Wadnaha iyo Xididdada Nidaamka Qanjidhada Nidaamka Dhiigga Nidaamka Dareeraha Saafiga ah Nidaamka Muruqo-Lafaha Nidaamka Taranka

## 9. Wali ma la ii tixgelin doonaa naafanimo haddii ay dhantaalankaygu waxqtiyada qaarkood tahay ama mid iga tagtay tahay?

Haa. Dhantaalanta mararka qaarkood ama dhacdooyinka, ama mid ka tagatay ayaa loo tixgal; iyaa naafanimo haddii ay in aad u badan xaddidayso waxqabadka nolsha marka la firfircoon yahay.

## Shaqo Codsiga

## 10. Ma la iiga baahanahay inaan sheego naafanimadyada markaan codsanayo shaqo si la ii difaaco?

Maya. Waad ka ilaashan tahay takoorka haddii wadaagto macluumaadkaas iyo haddii kaleba. Hase yeeshe, si aad u hesho u waafajin macquul ah, waa inaad u wargaliso loo-shaqeeyaha mustaqbal ahaan baahidaada u waafajinta. Loo-shaqeeyaha ayaa dhici karta inuu u baahdo macluumaadka qaarkood ee ku saabsan naafanimada si ay kuu siiyaan u waafajin.

## 11. Loo shaqeeyahaygu ma iiga baahan karaa aniga inaad qaato baaritaan caafimaad?

Haddii aad codsanayso shaqo, loo-shaqeeyaha ayaan ku weyddiisan karin inaad ka jawaabto su'aalo caafimaad ama aad qaadato baaritaan caafimaad ka hor shaqo u fidinta. Loo-shaqeeyaha ayaa ku weyddiin kara inaad qaban karto shaqada iyo in kale iyo sida aad u qaban doonto shaqada, iyada oo leh ama aan lahayn u waafajin macquul ah.

Ka dib marka lagu soo fidiyo shaqada, shaqo u fidinta ayaa dhici karta inay la socdaan shuruudaha qaarkood, sida:

- inaad ka gudubto baaritaan caafimaad, ama

- ka jawaabto su'aalo caafimaad qaarkood.

Dhammaan shaqaalaha cusub ee ka shaqeeya nooca la midka ah shaqada waa inay ka jawaabaan su'aalo isku mnid ah ama qaataan imtixaan isku mid ah, oo ma aha kaliya shaqaalaha naafanimada leh.

Guud ahaan, marka lagu shaqaalaysiiyo ee aad bilowdo shaqada, loo-shaqeeyaha ayaa kaliya ku weyddiin kara su'aalo caafimaad ama u baahan kara baaritaan caafimaad haddii:

- u loo-shaqayuhu ugu baahan yahay caddayn taageerada weyddiisigaaga u waafajinta, ama

- loo-shaqeeyaha oo aamminsan inaadan awoodin karin inaad u qabato shaqada si guul aleh ama ammaan leh xaaladdaada caafimaad awgeed.

## 12. Sidee ayuu loo-shaqeeyahaygu ula dhaqmi doonaa xogtayda caafimaad?

Sharciga ayaa u baahan in dhammaan diiwaannada iyo macluumaadka caafimaadku ahaadaan kuwo leh kalsooni asturnaan oo ka gaar faylasha kale faylasha shaqada ah.

## Raadsiga u Waafajinta Macquulka ah

## 13. Waa maxay “u waafajin macquul ah”?

“U waafajinta macquulka ah” aya ah dheellitir ama beddelid lagu sameeyo shaqada ama goobta shaqada ama sidii caadiga ahayd ama duruufaha fulinta shaqada u saamaxaysa codsadhaha ama shaqaalaha qaba naafanimada ah in ay si guul leh u codsadaan shaqada, uga soo baxaan xilak shaqadooda, ama ku ka faa’iidaysataan dheefahooda iyo u mudnaanshahooda shaqada. U waafajinta macquul ah ayaa beddeli doonin hawlgallada shaqo ee lama huraanka ah.

“U waafajintaada macquulka ah “ ayaa dhici karta inay ka duwanaato kuwa la siiyo kuwoa kale. Loo-shaqeeyeyaasha ama shaqo codsadeyaasha. Sababteeduna taas waa iyada oo u waafajintu ku xiran tahay nooca naafanimada iyo nooca shaqada. U waafajinta macquulka ah, siday doonto ha noqotee,ayaa ah inayna noqon mid qaali u ah si aan macquul ahayn ama carqalad ku ridaysa loo-shaqeeyaha. Loo-shaqeeyahaaga ayaa dooran kara nooca u waafajinta macquul ah ee layu siin doono; hase ahaatee, u waafajintu waa wax ku ool yeelato. Tusaale ahaan, loo-shaqeeyahaaga ayaa dooran kara inuu kii sameeyo dariiqa kugu habboon halkii wiishka aad u isticmaali lahayd asi wax looga qabto arrimaha marin u helka shaqada.

## 14. Maxay yihiin tusaalooyinka qaarkood ee “u waafajin macquul ah” ee lagu siin karo muddada nidaamka shaqaalaynta iyo hadhow inay kaa caawiso shaqo fulinta?

U waafajinta macquulka ah noqon karta qaabab badan. Qaar ka mid ah u waafajinta caadiga ah ayaa hoosta ku qoran.

- Bixinta agabyo qoraalka ah oo ku qaab marin loo heli karo, oo ah sida farta waawayn, Braille, ama cajalad dhegaysi.

- Dheelitirka ama u beddelidda jadwalka shaqada.

- U fidinta u akhriyeyaal ama turjubaano luqadda calaamadaha.

- Qabashada kulanka shaqo qorista, waraysiyo, imtixaanno, iyo qaybaha kale ee nidaamka codsiga ee ku yaal goobaha marinka loo heli karo.

- U qabashada shirarka shaqaalaha ee goobaha marinka loo heli karo.

- Siinta ama q u beddelka qalabka iyo aaladaha.

- Iskugu hagaajinta iyo u beddelka siyaasadha iyo habraacyada.

- Ugu beddelka jawiga shaqada siyaabaha fiicnaynaya marin u helka.

## 15. Sideen u weyddiistaa u waafajinta macquulka ah?

Ma jiraan nidaam gaar ah oo adigu, shaqaale ama codsade ahaan midkoodna, aad ku weyddiisato u waafajin. Lagaagama baahna inaad isticmaasho erayo gaar ah ama ereyada «u waafajin macquul ah» markaad weyddiisanayso, iyo waliba lagaagama baahna inaad qoraal ku weyddiisato . Kaliya waa inaad su sheegto loo-shaqeeyahaaga inaad ugu baahan tahay u dheellitir ama u beddel shaqada naafganimada awgeed. Diyaar u ahow inaad siiso loo-shaqeeyahaaga macluumaad ku filan si aad ugu muujiso inaad qabto naafanimo.

Haddii aad u baahan tahay ugu waafajin nidaamka codsiga, waa in aad u wargaliso loo-shaqeeyaha inaad u baahan tahay u beddel ama u dhellitir nidaamka codsiga ama waraysiga naafanimadaada awgeed. Waxaad weyddiisiga ku samayn kartaa hadal ama qoraal ahaan, ama qof kale ayaa kuu weyddiisan kara. Tusaale ahaan, xubin qoyska, saaxiib, hawl-yaqaan caafimaad, ama wakiil kale sida tababbare shaqo. Ba dib weyddiisiga marka la sameeyo, loo-shaqeeyaha ayaa weyddiisan kara inaad buuxiso foomamka qaarkood, amaaad raacdo habraacyo kale. Habraacyoada kale ee lagu weyddiisto inaad raacdo adigu ayaan loo isticmaali karin ka-hortagga u waafajinta macquulka ah ee waqtigeeda ku habboon in la bixiyo ama wax laga qabto.

Waxa muhiim ah inaad xusuusnaato inaan lagaaga baahnayn taariikhdaada caafimaad ama taariikhdaada caafimaad ee dhimireed oo dhan si aad u hesho u waafajin macquul ah. Waxa kaliya ee aad u baahan tahay inaad bixiso macluumaadka ku lug leh arrinta ee loogu baahan yahay in lagu sameeyo waafajinta macquulka ah.

## 16. Miyuu loo-shaqeeyahaygu hoos ugu dhigi karaa Imushaharkayga ama isiin doonaa in ka hoosaysa shaqaalaha kale ee shaqo la mid ah qabanaya awgeed aniga oo u baahday u waafajin macquul ah?

Maya. loo-shaqeeyahaaga lacag kaagama qaadi karo si aad u bixiso qiimaha kharasha ku siintaada u waafajinta macquulka ah ama lacag ka yar inta siiyo shaqaale kale booskaaga oo kale haysta.

## Xereynta Cabashada

## 17. Maxaan samayn karaa haddii aan aamminsanahay inuu loo-shaqeeyahaygu igu takooray aniga awgeed naafanimadayda?

Waxaad ku xerayn kartaa cabasho OFCCP. Uma baahnid inaad xaqiiq u ogaado inuu loo-shaqeeyahaagu waa qandaraasle